

Qofkee ayaa la siin karaa daryeelka caruurta haddii iskoolka, dugsiga xanaanada, hoyga xilli-firaaqaha iyo hawlaha waxbarasho ay xirmaan?

MSB1554 – april 2020

Si loo hakiyo faafinta cudurka faayraska covid-19 waxaa dawlada ama maamulka dugsi xanaano, hoyga xilli-firaaqaha ama hawl kale oo waxbarasho ay go'aan ku gaari karaan haddii la xirayo hawshan.

Haddii shaqooyinka la xiro waa in qaarkood waalidka ka qayb-qaata shaqo muhiim u ah bulshada la sii wadaa in caruurtooda la siiyo xanaano.

Adigaaga ah waalid waxaad fursad u haysataa inaad diiwaan-geliso baahida xanaano haddii hawshaada shaqo ay lagama maarmaan u tahay in la socodsiiyo shaqo muhiim u ah bulshada.

Adigu waxaad xaq u leedahay xanaano haddii keliya aanad xanaano u diyaarin karin qaab kale. Haddii aad tihiin laba waalid ah oo mid keliya ka qayb-qaata shaqo bulshada muhiim u ah markaasi waxaa aasaas ah in qofka kale hayo ilmaha.

Sidee ayaan u ogaanayaa haddii anigu aan ka shaqeeyo shaqo muhiim u ah bulshada?

Shaqo-bixiyagaaga ama cida aad shaqada u qabato ayay tahay inay, sida ku cad Hey'adda badbaadinta bulshada iyo heeganka *Qoraalka ee talooyinka guud ee xanaanada caruurta leh waalid ku jira shaqo bulshada muhiim u ah* (MSBFS 2020:3 och 2020:4), samayso qiimeynta ku saabsan haddii shaqadan la wadaa tahay mid muhiim u ah bulshada.

Shaqo-bixiyagaaga ama cida aad shaqada u qabato ayay tahay inay xitaa qiimeeyaan nooca shaqaalaha loo baahanyahay si loo socodsiiyo shaqadan dhanka heer macquul ah.

La hadal shaqo-bixiyagaaga ama cida aad shaqada u qabato si aad u ogaato haddii aad adigu ka mid tahay dadka loo baahanyahay.

Waa maxay shaqooyinka bulshada u ah muhiimka?

Waa shaqooyinka sababi kara dhibaatooyin bulsho xilliga ay dhibaato jirto ama ay meesha ka baxdo hawshaasi. Ama kuwa loo baahanyahay in looga shaqeeyo dhibaato bulsho oo markaas socota.

Kuwan waxaa socodsiiya tiro badan oo ah dhinacyada gaarka loo leeyahay iyo kuwa dawladeed.

Dawlada waxay tilmaantay 12 qaybood oo bulshada ah dhanka shaqooyinka muhiimka u ah bulshada inay ku jiraan:

- Qaybinta tamarta
- Adeegyada maal-gelinta
- Ganacsiga iyo warshadaha
- Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka iyo xanaanada
- Macluumaadka iyo is-gaarsiinta
- Qaybinta farsamada degmada
- Raashinka
- Difaaca milatariga
- Maamulka dawlad/degmo
- Badbaadinta iyo amaanka
- Caymisyada bulsho
- Gaadiidka

Sharaxaadaha iyo tusaalooyinka noocyada shaqooyinka bulshada u ah muhiimka ee gudaha qaybahan waxaa laga helayaa_

Qoraalka iyo talooyinka guud ee xanaanada caruurta leh waalid ku jira shaqo bulshada muhiim u ah (MSBFS 2020:3 och 2020:4).

Dheeraad ka akhri boggan:

www.msb.se/foreskriftomsorg

Sidee ayaan samaynayaa haddii aan u baahanahay xanaanada caruurta?

Haddii aad u baahantahay xanaanada caruurta oo aanad dabari karin keligaa, waa inaad baahida xanaano ku wargeliso degmada aad ku nooshahay ama hogaanka iskoolka, dugsiya xanaanada, hoyga xilli-firaaqaha ama hawsha waxbarasho ee kale ee ay khuseyso.

Degmada aad ku nooshahay ama hogaanka ayaa ku siin kara macluumaadka ku saabsan sida aad u samaynayso wargelinta baahida xanaanada caruurta.

Haddii degmada aad ku nooshahay ama hogaanka ay ku weydiyaan waxaa u baahan kartaa inaad baahidaada xanaanada caruurta ku caddayso caddayn laga helo shaqo-bixiyahaaga ama cida aad shaqada u qabato.

Intee in leeg ayay tahay inaan waalid ahaan isku dayo in aan xanaano caruur u diyaarsado "qaab kale"?

Waa inaad ugu horeyn eegta suurtagalnimada in caruurta lagu hayo guriga maadaama ujeedada xiritaanka iskoolka tahay in la yareeyo khatarta dhanka cudur faafinta.



Caawimaad ha weydiisan dadka ka mid ah kooxaha khatarta ku jira, tusaale ahaan dad gaboobay oo qaraabo ah, inay kuu hayaan caruurta!

Xagee ayaan la xiriirayaa dhanka su'aalaha?

Su'aalaha ku saabsan waxa ansaxa ah xilliga iskool xirid:

Hogaanka iskoolka, dugsiya xanaanada, hoyga xilli-firaaqaha ama shaqada kale ee waxbarasho.

Su'aalaha ku saabsan shaqada muhiimka u ah bulshada iyo Qoraalka iyo talooyinka guud ee xanaanada caruurta leh waalid ku jira shaqo bulshada muhiim u ah:

Hey'adda badbaadinta bulshada iyo heeganka

Bogga intarnatka: www.msb.se/foreskriftomsorg

Ii-mayl: samhallsviktigverksamhet@msb.se

Yaa ah hogaanka?

Hogaanka waa degmadaada haddii ay tahay degmada dugsiya xanaanada ama iskoolkeeda iyo tusaale ahaan maamulka iskoolka haddii ay tahay dugsi xanaano ama iskool madax-banaan.